

Waa maxay cilminafsi?

Waa maxay dhakhtarka cilminafsiga?

- Dhakhtarku wuuku caawin doonaa haddii aad soo martay wax xun.
- Dhakhtarku wuxuu kaala hadli doonaa dhacdooyinkan xunxun. Kaala sheekeysiga fiicnaan ayaad ku dareemi karaysaa. Ma jiraan kiniiniyo loogu tala galay xasuus xun.
- Dhakhtarku waa khabiir waana qofka adiga kula sheekeysta. Ma sameeyo go'aanada ku saabsan xaaladaada deegaan.

Sidee bey ushaqeysaa cilminafsigu?

- Waad is daaweyn kartaa haddii aadan fiicnaan dareemeynin. Is-daaweytu waa ikhtiyaar.
- Waad isku dayi kartaa daaweyntu. Haddii aadan rabin daaweyntu ama haddii aadan fiicnaan ku dareemeynin daaweyntu, waad joojin kartaa daaweyntu.
- Adigaa go'aansanaayo waxaad rabtid inaad sheegtid iyo waxaadan rabin in aad sheegtid.
- Dhakhtarku wuxuu ku qasbanyahay inuusan cidna usheegin waxaad asaga usheegtid. Waa inuu wax walbo asagu isku kali yeelaa. Wuxuu leeyahay waajibaad qarsoodi.
- Dhakhtarku wuxuu la hadli doonaa daryeelahaada oo ka socoda kooxda deegaankaada. Si wada jir ah waxaad uga fakari kartaan waxa loo sheegaayo kormeerahaada iyo waxaan loo sheegeynin.
- Dhakhtarku wuxuu ku hadlaa afka Jarmalka. Haddii aad rabtid, turjumaan ayaa ku caawin kara. Wuxuu sidookale asaguna leeyahay waajibaad qarsoodi.
- Daaweyntu waxay dhacdaa hal jeer asbuucii abaare sannad badhkiis.

Waraysiga kadib, dhalin badan ayaa fiicnaan dareenta, waxayna doorbidaan in ay wakhti la qaataan asxaabta markalae, waxayna markale awood uyeeshaan iney iskuulka u feejignaadaan.